SANDUUQA JOOGTADA AH EE DUGSIYADA MINNESOTA

Ardayda Mudnaanta Sii. Horumari Sanduuqa Waxbarashada.

MARKAAD CODAYNAYSO, SU'AASHAN AYAA KU JIRI DOONTA WARQADDA CODBIXINTA.

WAX-KA-BEDDELKA DASTUURKA · SU'AASHA RASMIGA AH EE CODBIXINTA

Kordhinta Maalgelinta Degmooyinka Dugsiyada

"Dastuurka Minnesota ma wax laga beddelaa si loo kordhiyo maalgelinta dhammaan degmooyinka dugsiyada ee laga helo sanduuqa joogtada ah ee dugsiyada, kaas oo ah sanduuq taageera degmooyinka dugsiyada iyada oo aan la kordhin canshuuraha dakhliga shakhsiga ama canshuuraha hantida, laga bilaabo Luulyo 1, 2027?"

⬭ HAA ⬭ MAYA

MAXAY SU'AASHANI KA DHIGAN TAHAY?

IN LA KORDHIYO MAALGELINTA DUGSIYADA

Minnesota waxay horeba u lahayd Sanduuqa Joogtada ah ee Dugsiyada. Wax-ka-beddelkan wuxuu kordhinayaa lacagta sannad kasta laga bixiyo sanduuqa, oo hadda ah qiyaastii **2–2.5%**, kuna gaadhsiinayaa **4.5%**. Waxaa lagu salaynayaa celceliska qiimaha sanduuqa saddexdii sano ee la soo dhaafay, si dugsiyadu u helaan maalgelin joogta ah oo la saadaalin karo.

DHAMMAAN DEGMOOYINKA DUGSIYADA AYAA KA FAA'IIDAYSANAYA

Hadday yihiin magaalooyinka waaweyn, nawaaxiga magaalooyinka ama tuulooyinka.

Dugsiyada Dadweynaha · Dugsiyada Charter-ka · Dugsiyada Qabiilooyinka Asaliga ah

LACAGTU XAGGEE KA IMANAYSAA?

Sanduuqa waxaa la aasaasay sannadkii **1858**, iyadoo laga sameeyay dhulal dadweyne oo loo qoondeeyay waxbarashada dadweynaha. Dakhliga laga helo macdanta, iibka alwaaxda iyo kiraynta dhulka ayaa la maalgeliyaa si loogu taageero ardayda maanta iyo kuwa mustaqbalka. Maanta sanduuqa qiimihiisu waa qiyaastii **$2.3 bilyan**.

IYADA OO AAN LA KORDHIN CANSHUURAHA DAKHLIGA AMA HANTIDA

Canshuurta dakhliga shakhsiga lama kordhinayo · Canshuurta hantida lama kordhinayo

HA KA TAGIN SU'AASHAN ADOON KA JAWAABIN

Marka la eego xeerka Minnesota ee wax-ka-beddelka dastuurka, haddii aad su'aashan ka tagto adigoon HAA ama MAYA midna dooran, waxay la mid noqonaysaa inaad u codaysay MAYA.

mnPSFamendment.org

Codbixinta hore way bilaabatay

Maalinta Doorashada: Talaado, Noofambar 3, 2026

© Minnesota School Boards Association 2026. Dhammaan xuquuqdu way dhowran tahay. Qoraalkan waxaa loogu talagalay in dadweynaha lagu siiyo macluumaad. Waxaa diyaariyey Minnesota School Boards Association iyadoo la kaashanaysa Association of Metropolitan School Boards, Minnesota Association of School Administrators, iyo Minnesota Rural Education Association.